Sahankii Richard Burton ee Bariga Afrika

Cutubkii 10-aad

Berbera iyo Agagaarkeeda

Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame

Oktoober 31, 2016

***Odhaahda Tifaftirka**: Waa cutubkii 10-naad ee tarjumaadda buugga Sahankii Richard Burton, oo ka kooban 10 cutub, oo markii ugu horeysay la daabacay 1858. Buugga waxa tarjumay Boodhari Warsame. WardheerNews waxa ay aad ugu mahadnaqeysaa Boodhari oo xil aad u weyn iska saaray sidii uu ugu soo bandhigi lahaa bulshoweynta Soomaaliyeed buuggan taariikhiga ah ee Sahankii Richard Burton. Waxaan fileynaa in akhristayaashu ay ka haleen dhacdooyin badan oo taariikh ku leh dhulka Soomaaliyeed.*



Aad ayay xiise u leedahay in hadda sida ay tahay la barbar dhigo wixii hore looga qoray carwadii weynayd ee Bariga Afrika.[1]

Bartema wixii uu qarnigii 16aad ka qoray 'Berbera iyo Jasiiradda Itoobiya' waxaa ku yiil qeexiddan kooban: "Markii dabaylihii degeen ayaannu shiraaca taagannay, wax yar ka dibna waxaannu nimi jasiirad lagu magacaabo Barbara, ninka meesha xukumaa waa Muslim.[2] Jasiiraddu aad uma wanaagsana, se waa barwaaqo aad loo deggenyahay, hilib badanna waa ay leedahay. Dadka deggeni waa dad midab madow u dhow leh. Hantidooda oo dhammina waa lo xoolo."

---

[1] 1567 (sanadii saldanadii Saylac la jabshay) Lopez Suarez ayaa caabbi la'aan qabsaday. Dadkii degganaa markii ay carareen ayuu sheegay;'Magaalada Barbora [Berbera] ee Saylac u dhow, waa meel aan ka duwanayn se aad uga yar'. *[B]*

[2] Ma malayn karo waxa Bartema uu u go'aansaday in ay 'Barbara' jasiirad tahay oo aan ka hayn kaliya in uu adeegsaday erayga 'insula' [jasiirad: dhul biyo kaga xeeranyiinh dhan walba] halka ay ka ahayd 'peninsula'[nus-jasiirad: dhul dhinacyo biyo kaga xeeranyihiin se dhinac ama ka badan berriga kaga qabsan]. Magaalada, marka baddu aad u kacsantahay, daad ayaa soo gala,. Sadcaalaha hore, sida muuqata, berriga ayuu ka hadlayay. *[B]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samawade Books

Liutenant Cruttenden kii I.N. [Indian Navy] oo wax ka qoray 1848, sidan ayuu meesha ku sheegay: ‘Carwo-sannadeedku waa mid ka mid ah aragtida ugu xiisaha badan xeebta, marka qabiilooyinka badan ee dhulalka fog ka yimidi ay bilaabaan in ay dhan walba u yaacaan. Intii aan qalcadihii[3] Berbera la dhisin, meeshu ka Apriil ilaa bilowga Oktoobar gebigeedu waa cidla xataa kaluumayste qura aan laga helin, se durba marka xilligu is beddelo, qabiilooyinka dhulka shishe deggani waxay bilaabaan in ay dhanka xeebta u guuraan, aqalladoodana u diyaariyaan martida la filayo. Doomo yaryar oo ka yimid dekadaha Yaman aadna ugu han weyn fursad ganacsi inta ayan iman doomaha kale ee gacanku ayaa degdeg u soo gudba, dabadeedna waxaa ka daba yimaada, laba ilaa saddex toddobaad ka dib, walaalohoodii ka balballaarnaa ee ka yimid Masqad [Cummaan], Suur, Ra'sal Khayma, iyo Bagalooyin xammuul sida oo ka yimi Baxrayn, Basra [Ciraaq], iyo Graen. Ugu dambaynta, Baaniyaalkii buurbuurnaa ee ganacsatada maalqabeennada ah ahaa oo Porbandar[4], Mandavie iyo Bombay ka yimi ayaa Koti[5]-yadooda la soo gala. Iyaga oo tanagyo subag oo maran tiradana ka badan doontooda ku safanyihiin ayay jago rasmi ah ka cariirsadaan safka hore ee dekadda. Maalgashigooda sare, dhagartooda iyo galgalkooda xeesha dheerna isla markaba dadkii la tartamayay oo dhan ayay iska fogeeyaan.

‘Xilliga carwadu heerka sare marayso, Berbera waa Baabil sax ah, sii ba is dhexyaaca iyo afafka kala duwan. Wax odaydhaqameed ah la ma dhegaysto, xeerarkii waayo hore ayaana sharciga meesha ah. Murannada qabiilooyinka dhulka gudaha ah ka yimi maalin walba waa ay dhacaan. Dadka dagaallamayaa inta meel xeebta ah oo magaalada wax yar ka durugsan isla tagaan, si aysan ganacsiga carqalad u gelin, ayaa waran iyo toorrey wax lagu xalliyaa. Xiriirro dhaadheer oo awr ah, badanaana ay haween kaliya wadaan, ayaa soo gala oo baxa maalin iyo habeen. Waxay taxanyihiin ilaa meel fog in magaalada ka durugsan, carruur madmadow sadcaal ku daalay oo mararka qaarkood la socdana waxay calaamad u yihiin imaashihii Kaafiladii addoonta ee Harar iyo Cifaat ka timi.

‘Guraagada iyo Hararіga addoonta ka ganacsadaa wuxuu Berbera kula kulmaa dhiggiisa ka yimi Basra, Baqdaad, iyo Bandar Cabbaas. Gadaabursiga cawaanta ah ee sida wacan halkii burukada madaxa ugu quruxsaday haragga idaad ee casna waxaa la arkaa iyaga oo baalal goroy iyo xabko si nabadgelyo ah wax uga dhaafsanaya Baaniyaanka hadal macaanaha ah ee Porbandar ka yimid ee xeel inta uu ka gaaray doontiisa ku dul nool. Duubkiisii oo haddiiba lagu arko shaki la’aan laga tuurayo inta xeraystay ayuu marba in yar badeecaddiisa soo dul saaraa darin duful ah oo xeebta ugu fidsan.

---

[3] Waa afarta qalcadood, nooca martello, [qalcado gaagaaban oo badanaa xeebaha laga dhiso], oo halka magaalada cariishyada ahi ay hadda ku taal uu Xaaji Sharma’arke ka taagay. Wuxuu halkaa dejiyay soddon askar Carab iyo Afrikaan isugu jiray oo buntukhyo sita. Hadda waa burbureen oo waxaa lagu burburiyay Amar Cadan ka yimi. *[B]*

[4] Magaalo xeebeed ka tirsan Gobolka Gujaraat ee dalka Hindiya. Waa halkii uu ku dhashay Mahatma Gaandi. Mandavie iyo Bombay iyaguna waa isla magaalooyin kale oo Hindiya ah. *[T]*

[5] Bagala [baqaala] waa doon ganacsi Carbeed, Kotiyada waxa laga leeyahay Xeebta Waqooyi ee Galbeedka Hindiya. *[B]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samawade books

‘Bisha Maarso dhammaandkeeda carwadu waxa ay ku dhowdahay in ay xiranto, doomo nooc walba leh oo afkaa jooga oo sinjaarro saddex ilaa afar isu la shiraacanayaa ayaa bilaaba safarkoodii ay meeshii ay ka yimaadeen ugu noqon lahaayeen. Doomaha Suuriga ayaa ah kuwa marka ugu dambaysa baxa, todobaadka ugu horreeya ee Abril marka la gaarana Berbera cidla' ayay mar kale noqotaa aanay muuqan wax tusaya in ay meel magaalo 20,000 oo qofi degganaayeen ahayd, marka laga reebo lafo geel iyo ido la qashay iyo qalfoofka aqallo yar oo si taxaddar leh xeebta loo tubay, si ay diyaar ugu ahaadaan sanadka soo socda. Subaac ayaa hadda fursad ay badda ugu soo dhawaadaan hela. Libaaxyo ayaa magaalada si caadi ah loogu arkaa, ilaa waqtiga kulaylaha si fiican loo dhex galo. Bishii Abril sannadkii la soo dhaafayna, todobaad uun ka dib markii carwadu dhammaatay, waxaan arkay saddex goroyo oo aayar xeebta lugaynaya.’

Asalka Berbera wax badan laga ma oga. Al-Firuzabadi[6] wuxuu si male weyn leh u sheegaa in ay ku bilaabatay laba ugaas oo Ximyar[7]-ta Koofur Caraabiya ka yimid. Abbaarihii 522 CD ayaa ciidammadii Anushirwan[8] Yaman ka soo cayriyeen Xabashadii oo dib u caleemasaareen amiir Ximyari ah oo hoos taga Boqorka Beershiya. Sheeko dhaqameedku waxay sheegtaa in dekeddaa Furus, Carab, Turki, Gaalla iyo Soomaali uu mid ba mar qabsaday. Mustaqbalkeeda aakhirkana waxay u egtahay in uu sidii waa hore isu rogrogi doono.

Waqtigan hadda la joogo, waxa Berbera dufowga ugu wacan is colaadin hoose. Garxajis, curadkii Isxaaq Al-Xadrami, waxay qabsadeen silsiladda buuraha Golis iyo Wagar ee ku dhacda meel afartan mayl xeebta u jirta, halka Awal oo ah yaraankii ay isaga iyo faraciisii degeen dhulka hoose ee Berbera ilaa Saylac ku siman. Lafahaa xooggaga badani waxay labaduba sheegtaan kastanka iyo faa'iidada dekadda, iyaga oo sabab uga dhigaya in ay si wadajir ah Gaalladii uga kacsheen. ha se yeeshee, Habar Awasha oo meesha haysata ayaa xaqaa isku keli yeeshay. Aano ayaa ka hurta halkaa, ganacsiga meeshuna wuxuu la wiiqmaa colaadda kuwii lahaa uun. Taa waxaa dheer, lafta Habar Awal colaad dhexdeeda ahi ka ma marna. Laba jilib oo walaalo ah, Reer Yoonis Nuux iyo Reer Axmad Nuux[9] ayaa asalkii Berbera degay. Kan hore, in kasta oo uu ka tiro badanyahay, wuxuu kan dambe sannado dhawr ah u oggolaaday qaybsiga faa'iidada. Se markii Cadan

[6] Abu-al-Taxriir Ibn Ibraahin Majdu al-Diin al-Fayruzabadi (1329 – 1414). Dalmare iyo jugraafiyahan Carbeed oo asalkiisu Faaris ahaa. Waxsoosaarkiisii qoraal waxaa ka mid ahaa oo aad loogu xusuustaa *Al-Qaamuus Al-Muxiidh*. *[T]*

[7] Boqortooyadii Ximyar ee Yaman ka talin jirtay 110 CH – 520 CD. *[T]*

[8] Anushirwan Khan (Anūshīrvān Khān): wuxuu ahaa boqorkii saldanada Ilkhanaan ee qaybta ka ahayd xukunkii baahsanaa ee Mongoolka. Wuxuu talinayay muddadii u dhexaysay 1344 – 1357. *[T]*

[9] Yoonis iyo Axmad waxay ahaayee walaalo ilmo Nuux ah. Sagaal ayay Isxaaq Al-Xadrami ka tirsadaan. Kan hore afar wiil ayuu dhalay, Xoosh Yoonis, Gadiid Yoonis, Maxamuud Yoonis iyo Shirdoone Yoonis. Faracooda waxaa dhammaan loo yaqaan Cayaalka ama dhashii Yoonis. Cayaal Axmad Nuuxu waxay degaan dhulka magaalada ku qabsan ee Hoobadyada u foorara, Ciise Muusahana waa is dhex degaan. Mikaahiilku waxay sheegtaan dhulka Bari ee u dhexeeya Siyaaro ilaa Illanti. Waa dooxo dhir leh oo biyo wanaagsan laga helo, marso aan u wanaagsanayn doomaha naah. [*B fn.]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Sanewade books

Ingiriisku qabsaday oo ganacsigii qiime sii yeeshay ayay laftii tirada yarayd ka jafeen kuwii kale oo kaligood sheegteen in ay yihiin 'Abbaannada' martida ee xilliga carwada. Dabadeed, dagaal ayaa sidaa ku bilowday. Reer Yoonis waxay taageero ka heleen qabiilka Majeerteen[10], Reer Axmad na waxay u yeerteen Garxajis, gaar ahaan jilibka Muuse Carre oo uu Xaaji Sharma'arke ka dhasay, taageeradiisana ku jabsheen oo ku cayrsheen Reer Yooniskii. Kuwaa oo Berbera ka yaacaya ayaa degay hulka Bulaxaar oo xiriirkoodi hore ee Hindida iyo ganacsatada shisheeye ku soo jiitay macaammiil badan. Se jidku ma xassilloonayn oo doomo badan ayaa lumay, 1847diina Soomaalida Ciise ayaa dhegta dhiigga u daray maatidii koytada ahaa, taa oo ku khasabtay in ay Reer Axmad heshiis la galaan. In kasta oo colaaddii sidaa ku dhammaatay, dhabta ah in ay taasi dhacday ayaa hurgumo aano kicisa noqotay. Cawaantan heshiisku waxba la ma aha, shaqaaqada ugu yar ee labada dhinac midkood ka dhacdana waxay noqotaa baaq colaad soo cusboonaatay. Sharraxaaddaa caajiska leh dabadeed, waxaan ku noqon doonnaa, gacaliye L[umsdenoow] hawlahaygii Berbera.

Daal badan waa dhif in ay xigto hurdo dheeri. Markii cadceeddu soo baxday ayaan ku kacay codad dhaadheer oo ka soo fulayay duddo wajiyo madmadow iyo tuurar ciiro ah leh oo illinkii xiray, horena isu soo kakabinaya, si ay martidooda cusub u arkaan. Dadka Bebera wuxuu Dubayr ogaysiiyay in aan Buuraha Geri shan maalmood kaga nimi, waxayna ku dhaarteen in taasi ay suuragal tahay iska daaye aannaan xataa waligeen Harar il saarin. Markii imtixaankii aan iska jiray la iga qaaday oo aan ku guulaystay ayaan mundulkii jaalleyaashay ay ku noolaayeen ka tegay oo aaday in aan soo eego gacanyareyaashaydii iyo xoolahaygii. Kuwa hore dhoollacaddayn ayay la dhaceen; xilkii iska ride, Cayaal Axmad oo halkaa caro dibbirsan ka il hele, timir iyo bariis iyo shaah sonkor lehna ka dherge, waa maaddo kale oo niyadda dhista e. Waxay imminka rumaysteen in ay dhawr beri ku arki doonaan xaasaskoodii iyo reerayowgoodii. Ha se yeeshee, wajiga Yawmul Qiyaame waxaa ka muuqday *walaac dahsoon*. Mar kale ayay fulaynimadiisii soo ifbaxday, isaga oo ku faqay in naftiisu magantayda tahay. Baqalihii masaakiinta ahaa innaba si fudud loo ma baanan karin. Iyaga oo dhabarradooda koorayaashu ilaa lafta jareen ayay sidii bisado caraysan u foognaayeen, madaxa si murugo leh u laalaadsheen, feerahoodana waxa ka muuqday calaamado gudguduudan oo kati waran ku dhigtay. Inta in badda loogu soo mayro, faashado biyo qabow leh lagu duubo, si fiicanna loo quudiyo amray, ayaan u dhaqaaqay in aan banka Bebera soo indha'indheeyo.

'Hooyadii Caydha', sida ay Carabtu ku magacaabaan magaaladan, waxay u egtahay Saylac. Magaaladu, haddiiba magacaa oo kale loogu yeeri karo waxan hadda ay ka taagtaaganyihiin uun xayn aqallo arradan oo raaro uskag badan leh, waxay darafta waqooyi kaga taal dhul *suubaan* ah oo si aan la dareemi karin uga soo foorara cagta

[10] Waxay aad ugu badantahay in gurmadka Majeerteenku xagga badda oo ay ku xooggaanayeen ka yimid, illeen degaan ahaan goobta ka ma dhawa, inay intaa dhulku isu jiro soo mareenna waa mid aad u adag! Cilmibaare Axmad I. Cawaale ayaa mudan mahadda soojeedinta iyo xusuusinta arrintan. *[T]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samewadata Books

kuraha Koofureed. Bahalnimada cawaantan caqligaabyada ah ayaa ku soo ururshay weynankeedii qiyaasta lix-meelood oo meel intii ay waagii hore la'ekayd. Ku dhowaad hal mayl ayaa dhulkan hadda cidla'da ah waxaa daadsan jajabka quraarado iyo maacuun dhoob ah. Jaahilnimadoodu waxay u doortay halkii carriga ugu xumayd. *Xeer jajabku* waa sharciga Soomaalida e, halkii aabbuhu ku dhaqmo ayaa wiilkuna ku sii dhaqmaa, sidaana wiilka wiilkiisu yeelaa. Koofurta iyo Bariga waxaa ka ah bannaanno-xeebeed xaani ah oo uu hir sare qaarkood ku soo rogmaday. Halkaa waxaa ku yaal ceelal biyo adag leh, qashinka iyo qarmuunkuna waxay meesha ka dhigeen wax dhab ahaan laga yaqyaqsoodo. Beryahan dambe, jiidda xeebtu waxay noqotay qabuuro ay ka buuxaan qabriyo inta ay lala'egyihiin tilmaamayso sheekada Soomaalida ee ah in carriga ay waa ku noolaan jireen dad aad u waawayn. Sheeko dhaqameeddu waxay ku magacawdaa Bandar Cabbaas [?]. Xagga Bari ee magaalada ku dhow waxaa mara khuuriga barwaaqada Berbera ka dhiga. Jiid dheer oo cammuud iyo dhagaxnuuradeed samayska guud ee xeebtan ah ayaa dhererkeedu ka difaaca dabaylaha waqooyi. Ballaceedu waa qiyaasta 3/4 mayl, dhumucduna waa 6 ilaa 15 fathom[11], ku dhowaadka Raaska maraakiibtu ku xirtaan inta ayan badda u gooshin. Dhabarka magaalada iyo meel ilaa toddoba mayl jirta waxaa dhaca Hoobadyaka hoose, iyo musduleed cuddoon oo dhagaxnuuradeed iyo dhagaxciideed ah. Dus lagu magacaabo Dus Malable waxa marka cimmiladu saafi tahay ka muuqata gidaarradii dhagaxdixeedka ahaa ee Wagar iyo Golis oo waa aalladda aneroid[12] dheerarkooda lagu ogaaday in uu gaaro 5,700 cagood in ka sarreysa cabbirka simadka badda.[13] Dhanka bariga ka xiga banka Berbera waxaa ka soo xeera kuraha Siyaaro, galbeedkana figaha dhaadheer ee Dabasani [?] ayaa soo koobta.[14]

[11] Halka *fathom* wuxuu u dhigamaa 2 yaardi, ama 6 cagood, ama 1.830 mitir. *[T]*

[12] Aaladaha lagu cabbiro inta shay dhulka ka sarreeyo, siiba kuwooda aanan dareeraha sida meerkuriga iyo waxa la midka ah adeegsan ee qallallan. *[T]*

[13] Waxaa cabbiray Lt. Herne oo qoray in ay 'dayrta qabowdahay, sida geedka dayibka ah ee meesha ku yaallaa caddaynayo, diraacdana uu qaboojo Maansuunku. Waxaa ka buuxa ugaar, digiiran laga bilaabo ilaa maroodi. Buurtani waxay ku fiicnaan lahayd 'Sanatorium [isbitaal, siiba kan qaaxada lagu daweeo]'. Nasiib darro, Golis waxaa dega Habar Garxajis, Ciise Muuse, dhagarqabeyaal. *[B]*

[14] Carriga Soomaaliyeed dhinaciisani waa banan ciid ah, geed qodxeed teelteel ah leh oo ay ku xeeranyihiin labada Oogo, tan sare iyo tan hoose. Labadaa tan dambe, oo ah buuraha xeebta ku dhereran, waxay ka soo bilaabataa Tojorre, waxayna taxantahay ilaa Karam (dhigta 46˚ Bari), halkaa oo ay ku kala qaybsamaan. Masaafada ay xeebta u jiraan waa kala duwantahay, waa na inta u dhexaysa 6 ilaa 15 mayl. Dhererkoodu waa 2000 ilaa 3000 cagood. Korkoodu waa qallayl aan dhirta caadiga ahi ka bixin oo ciiddii roobab ka mayreen. Oogooyinka sare waxay xeebta u jiraan 8 ilaa 40 mayl, waxayna dhererka u dhexeeyaan 4000 ilaa 6000 oo cagood. Waxaa aad uga baxa dhirta fooxa , beeyada iyo dayibka. Waa taagga babacda derbiga la moodo ee badda xigee xeera carriga gurada ballaaran ah ee xagga gubanta u fidsan. Dhanka waqooyi, waa kan xeebta xiga e, waa taag togan oo figta sare ay wareeg tuubbaysan oo aayar dhanka koofureed u roganta tahay. Jihada guud ee ay u kala dhacaani waa Bari-Waqooyi iyo Galbeed-Koofur. Waxaa iyaguna jira saddexa fiiq ee buuraha 'Ourat' [?] loo yaqaan oo iyagu xagga waqooyi u jeeda. Qayb walba oo bananka teedadkaa buuraha ah u dhexeeya ahi magac degaanka looga yaqaan ayuu leeyahay. Waxaa ka mid ah 'Dooxa Shimbiraale' oo galbeedka ugu fida, laga bilaabo buurta goonida u taagan ee Dimoli [Dhaymoole] ilaa lagu geeyo Geuli Dinanjir [?] iyo Gularkar [geel-loo-kor?] Maadamma ay dixo badan oo roobabka mansuunka karado biyo ah ka soo rogaa ay jaraan, waxaa ka baxa geedgaab qodaxley ah, barde, dacar iyo tiin kala jaad ah. *[B]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

SanleWadeBooks

Yaab ayay lahayd in aan ka fikiray iskhatalidda ay leedahay in Cadan aan halkaan ka door biday.

Carwada Afrikada Bari waxay leedahay cimmilo wanaagsan, biyo badan – barwaaqo 'marka aad Cadan soo degganayd uun si dhab loo mahadiyo', Maansuun dhexdhexaad ah, carrasan bannaan ah, marso aad u wanaagsan, iyo ciid waxsoosaar sare leh. Waa meel ganacsigu ku kulmo, wax la tartamaa waa yaryihiin, inta Caraabiya lagu kharashay fuundiyo baas dhagax iyo nuurad nuskeed ayaa dhulkan wada guryo, beero iyo dhir ka dhigi lahaa. Haddii Carlyle[15] la xigto, Isha Cadmeed waa 'buur murugo leh oo kor u shareeran sidii Pisgah[16] abaarsatay, foorrarradeedana ay ka muuqdaan kaliya cidla ciirsila', cammuud, biyo milix leh iyo qarfe.' Meesha la degganyahay waxay ku dhex taal 'Devil's Punch [B]owl[17]' sagaal bilood oo sannadka ka mid ah kulayl cabbur ah, Samun iyo duufaan-dhuleedna isu beddelaan, 'biqil, biyo iyo dhir midna ma leh.' Sidii Ibn Batuuta uu qeexay 500 oo sano ka hor, waxba ka ma baxaan roob la'aan darteed. Baalfallaadh halkan ku ma noolaan karo, iska daaye tuke ayaan ku baraarin[18] – caafimaadkana aad bay ugu darantahay. Ciidan la'aanteenna halkaa waxaa iyana la mid ah lacagta aan ku khasaarinaynno, rajada guud ee Galbeedka Hindiyana laga qabana waa in bad gurtay oo dab ahi ay sidii Vesuvius[19] ay mar kale raaskan xun u beddeli doonto hog weyn oo hulaaqaya.

Nasasho maalin ah dabadeed, waa jirka uun e niyada ma aha, Soomaalidii waxay isku haysteen Abbaannimo.[20] Jaallayaashay ayaan u raacay in aan burbur xiiso leh oo

[15] Thomas Carlyle (1795 -1881); wuxuu ahaa macallin /qoraa / taariikhyahan Scotland u dhashay. *[T]*

[16] Mount Nebo / Fasga / Jabal Siyaagah: waxaa la rumaysanyahay in ay tahay buurtii uu Nabi Muuse (n.k) uu Alle ku la kulmay. Wabiga Joordan ayay bari ka xigtaa. *[T]*

[17] Dhul godaan bohol ballaaran oo kor ka furan ah. Dhul sidaa u eg oo Surrey, carriga Ingiriiska, ku yaal ayaa magacaa la yiraahdaa. *[T]*

[18] Tijaabada waxa qaaday sarkaal Bombay ka keenay xayn baalfallaadhyo iyo tukeyaal ah. Kuwa hore waxay u le'deen scorbutic [scurvy: cudur nafaqo la'aanta, laga qaado siiba tan milixa iyo borotiinka] ayaan filayaa; kuwa dambana waxay ku sii joogeen nolol aan farxad lahayn oo haddii ay kuwii yaryaraa in ay meesha ka baxeen ay arkkeenna iska diiday in ku sii noolaadaan sidaa xilka leh. *[B]*

[19] Buur foolkaane caan ah ka qarxo oo ku taal gobolka Naples ee dalka Talyaaniga. [T]

[20] Abbaanku hadda waa sida cayayaanka Bebera . Doomuhu inta aanay baroosinka dhigan ka hor, ama dhab ahaan aanay ba Raaska la soo laaban, dud Soomaali ah sidii kaarigii hudheellada u degdegaya ayaa la arkaa iyaga oo xeebta dhinac ordaya. Waa ay u dabaaltartamaan doomaha, kan ugu horreeya ee soo fuulaana wuxuu warsadaa magaca abbaanka. Haddii aanu jirin, wuxuu taabtaa naakhuudaha ama shaqaalaha mid ka mid ah oo uu sidaa isgu qoraa Abbaan. Alaabta la soo dejiyo ninka sii gudbiya ayaa wakiil ka ah. Habka dallaalku hadda wuxuu noqday mid murugsan. Waagii hore qiimuhu wuxuu ahaa laba baac oo marada suufka bullugga ah ee Sacuuda la yiraahdo. Taa hadda waxaa loo rogay afar beesadood oo lacag ah. Doollarka ayaa ah lacagta ugu mudan, rupeegana waxaa lagu qaataa qiime jaban. Ganacsatadu waxay bixiyaan hadba heer, kan ugu hoseeyaa uu yahay 1% laga qaato ganacsatada Masqad iyi Suur. Ganacsadaha ayaa cunnada Abbaanka qaba, marka xilliga carwadu xirmana wuxuu siiyaa go', kabo saandal ah iyo lacag ilaa lix doollaro ah. Baaniyaalka maalqabeenka ah iyo Mehmaandiyadu [Mehmand, gobolka Chhattisgarh ee Hindiya] waxay siiyaan cunno iyo dhar, inta ayan ambabixinna 50 ilaa 200 oo doollar. Ha se ahaatee, dabaqaddani faa'iido badan ayay helaan oo dhawr doollar ayay badawida daymiyaan marka Carwadu dhammaato, waxayna ku xiraan in ay iyada oo sentiba senti saaranyahay ay dib u helaan marka

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

SamiWadle Books

magaalada agteeda ah booqdo. Sii socodkii, waxaa nala tusay cadad salfar iyo alum ciidi ku dheehantahay ah, dhulalka hoosana jaleelo iyo carmo aad cidina beerin ayaa ka baxayay. Markii aannu mayl u soconnay xagga koofur-koofur-bari Berberada maanta ka xigta oo aannu bannaan dhag ah u baxnay, waxaannu ugu tagnay wixii ka haray dhisme yar oo ilaa siddeed yaardi oo labajibbaaran ah, laba qolna loo kala gooyay. Sida muuqata, waa masjid. Qayb kor u yara kacsan waxaa ka muuqday calaamado mixraab, qaybta kale waxaa dhici karta in ay ahayd qabriga wali hadda baaliyoobay, ama waxaa dhici karta in ay qalcad ahayd laga difaaco balli meesha u dhawaa. Darbiyadu waa burbur dhagax iyo dhoobo lagu nabay sibir sidii dhagax u adag oo lagu barxay dhagxaan quruurux ah.[21] Meesha agteeda waxaa ku yaal barkad yar oo aan dheerayn oo nuurad iyo dhagax la isku qasay ka samaysan, shan yaardi iyo toban yaardi la'eg, ay ka muuqato dhuun-biyood wali qaybi ka hartay, looguna talo galay in ay noqoto sida taangiga la dhaansado. Haddii aannu dhadhaabyadii kore qaadnay, waxaannu ogaannay in guduha ay ku ku wareegsantahay sulphate-kii nuuraddu oo ciid siqaysaana buuxisay. Dhumucdu waa ilaa 15 inji, qotada hoosena sagaal. Markii aannu konton yaardi xagga kuraha u raacnay ka dib ayaa raadkeedii naga lumay, dhagxaanta wixii fuqayay waxaa dhici karta in qabuuro loo guray, ciidduna waxaa dhici karta in ay qaybtii adkayd duugtay.

Baqalaheennii ayaannu fuulnay oo xagga koofur-koofur-bari iyo Buurta Dubaar[22] qabannay. Sagxadda dhulka, oo sida ka muuqata siman, ayaa waxay kor u kacdaa 100 cagood maylkiiba. Meelaha badankooda ciid jilicsan ayaa ka sarraysa gawaan la moodo dhagaxnuuradeed iyo shacaabidhireed in la isku la kabbisay. Waxaa ka muuqday calaamad karad biyaxoor, dhagaxnuuradeed biyo qarqooreen oo sidii marmar u rasaysan, jajab dhagaxbaruur ah, dhagaxqarshi, dhagaxmadow, dhagaxdixeed, iyo dhagaxfoolkaan falliirro dhuudhuubanoo dhaadheer ah ayaa meel walba daadsan dhulka. Halkan iyo xaggoo ba karado kuraha ka soo rogmay ayaa khuuriyaal ka jeexay meelo shan ilaa lix cagood simadka ka hooseeya, jiq dhir ahina waxay ka muujinayeen safaf gunta dhexe ah. Dhirta oo aad ugu yar xagga xeebta darteed ayaa carriga ugbaad noqdaa. Markii xagga buuraha aan u sii dhawaannaba geedka Quraca noociisa Sarmaanku waa ku bullaalay,

---

sanadka xiga ay furanto carwadu. Sadcaalayaasha aan ganacsiga u imani waa in ay abbaanka quudiyaan, se ku ma khasbana in ay lacag siiyaan. Dabcan, Soomaalidu fursad walba ayay kaga faa´iidaystaan Yurubiyaanka koytada ah. Mr. Angelo, ganacsade Sansibaar ka yimi, ayaa laba sano Buulaxaar degganaa. Dallaalkiisii oo lafta Gadiid Axmad ahaa iyo Carab weheliyay waxaa la yiri waxay ka dhufsadeen ilaa 3000 doollar. Sida xeerka ah, Abbaanku wuxuu leeyahay 1% iibsashada iyo iska iibintaba, addoomahana laba doollar ayuu ka qaataa madaxii. Bundad walba oo dhar ah doollar barki ayaa laga qaataa. Xabkaha iyo bunka dallaalkoodu waa 27 kii rodol ba mid. Hargaha geela midkiiba doollar iyo bar ayaa laga baxshaa, hargaha idaha iyo riyaha afar beesadood , subagguna waa qiyaasta 1%. Lt. Herne wuxuu xisaabiyay 2,000 oo doollar in ay dhantahy lacagta la qaato xilliga Carwada. Sidaana, xaaladda rifanka ah ee Berbera ay hadda ku sugantahay awgeed, badeeco 10,000*l* ka badan la ma kala iibsado. Qiimayntaan dadka degaanku waxay ku sheegaan in ay aad u hoosayso. [*B En.]*

[21] Sida ay isugu egyihiin 'Gach'-ka Beershiya iyo sibirkan oo burburro badan oo Berbera ah laga helo waxaa sheegay dalmarro kale. *[B]*

[22] Ilaa 7 km ayay Berebera xagga berriga ka xigtaa, waana halka biyuhu uga yimaadaan magaalada Berbera, ilaa waagan la joogo. *[T]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samewadle Books

geedka Kulanku ctucubyo ayuu u baxay, Dhuurtuna xagga iyo xaggoo ayuy jiq isku baxday ka yeeshay. Wax ugaar ah ma aannaan arag, marka laga reebo dhowr cawl ah oo didaya.

Fuullimaad todoba ilaa siddeed mayl ah ayaa na geeyay gun qallayl biyamareen ah oo ay ka baxeen dhir doog ahi, dadkuna u yaqaannaan Dubaar Weyne. Jaantan dhulka ah oo ilaa mayl barki dherer la'eki kuraha ka sarreeya biyaha ka soo dhaca ayaa gala. Laasas fara badan oo afar ilaa shan cagood qodan duunyaduna biyo badan ka hesho ayaa bartamaha ku yaalla. Laasaskaasi, in kasta oo sagxadda kore ee dhulka ay ku yaalleen, waa ay gureen, halkoodiina waxay la caddaatay nitre wasakhaysan, biyuhu se macaan la iska cabbi karo ayay ahaayeen. Hal mayl haddaannu ku sii soconnay daanta koofureed dhagaxnuuradeed adag oo hollob leh ah, waxaannu helnay biyaqabtinka kale ee oo lagu magacaabo Dubaar Yar. Durdur biyo wiyeer qandaca ah leh oo dhulka gala ayaa ka soo hoobanayay kuraha dhulka ka sarreeya, dherer 400 ama 500 yaardi ah. Heerkulka dhulka kurta hoosteeda ah wuxuu ahaa 105.98° Fahrenheit [41.1°Celcius]. Kulbeegga cimmiladu wuxuu isku taagayay 80°, qalabka aneroidkuna wuxuu sheegayay taag 728 cagood ka sarreeya simadka badda. Qararka durdurradaa ka shisheeya waxaa ka buuxay burburro masaajid iyo guryo ahaa waa. Waxaannu booqannay qalcad yar oo isha biyaha ka sarraysa. Jaranjarooyin ayaa laga dhisay, labada qol ee hooseeya waxaa laga jeebay buurta oo la qoday, dabaqa labaadna waxaa ka muuqday saddex qol. Alaabta lagu dhisay waxay ahayd dhagax la burburshay, qaabkuna wuxuu u ekaa guryihii Gaallada. Ha se ahaatee, waxaannu aragnay sibidh wanaagsan oo lagu barxay jay adag, quraarado jajabkood, iyo dhoob buluug lagu aslay, kuwaa oo ah alaabooyin aan hadda laga aqoon Afrika dhankeedan. Figta buurta ugu dheer waxay hagayaasahu nooga tilmaameen dhisme kale oo u eg kii qalcadaha ilaalada Turkiga ee Cadan. Markii aannu mayl rubuc la' ka soconnay Dubaar Yaar ayaannu helnay madaxa Dhuunbiyoodda Berbera. Waxaa, sida muuqata, la dhigay biyamareen taag hoose ah. Halkan ayuuy dhismaheedu kaga kan laga dhisay xagga xeebta agteeda, waxayna u badantahay in ay hawsheedu ahayd in ay biyaha soo riixdo ilaa ay hoobadka soo gaaraan. Taxeedii ayaannu sii raadgoobnay ilaa toban yaardi, halkaa oo ay ku libidhay ciidda hoosteeda, wax barkad kayd u egna ma aannaan arag oo aan ka ahayn balli qaab silloon leh[23].

[23] Liutenant Cruttenden wuxuu ka fikiraa dadkii dhisay iyo waaga ganacsiga Berbera u baahday hawsha intaa qara la'eg , wuxuu u dhowyahay in uu arrintaa u saaro qabsashadii Beershiya ee Cadan waayihii Anushirwan. Wuxuu sheegaa in ganacsigii Badda Cas ka socday uu waagaa xoog lahaa, carwadii hore ee Hisn Ghorab [Xisn-al-Ghuraab /Qalcaddii Tukaha (Yemen)] iyo Cadan barwaaqo iyo hanti ayaa yiil, Beberana shaki la'aan waxay dhoofin jirtay, sida ay hadda ba yeesho, foolmaroodi, faleen, iyo baalal goroyo. Se, in kasta oo dhulka Soomaaliyeed ee xeebaha ah uu sheekooyinka Furus iyo Beershiya ka buuxo, dhismeyaasha Berbera u dhow, oo ku yaal carri maansuun iyo dabaylio culusi ka dhacaan, ma mutaysan wax aan ugu tirinno soojireen 1300 oo sano ka hor.
Soomaalidu waxay sheegaan in toban fac ka hor awoowayaashood ay Gaalla ka eryeen Berbera, dhismeyaashaana waxay u tiiriyaan cawaan waayo hore jirtay. Waxaan haddaba anigu door bidaa in aan haraadigaa Berbera u dhow u tirsho Cismaaniyiintii oo markii ay Cadan qabsadeen ka dib, xilligii Sulaymaan Baasha 1538, yamanna haystay muddo ilaa 100 sano ah, iyaga oo ciidammo u ah Boqorkii

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved
Sanewadeebooks

Maalmo yar dabadood, aniga oo uu i weheliyo Liutenant Herne ayaan u kooraystay in aan soo indha'indheeyo Biyo Guure. Markii aannu Berbera xagga koofur-bari ka soconnay qiyaasta ilaa toban mayl, ayaannu galnay dhul adag oo godan, durbabana waxaannu ku soo dhacnay dix qiyaasta 250 yaardi ballaca la'eg. Daamaha waxa ka baxay Brab [?], Dhuur, Qoome iyo dhir kale oo doog ah. Biyo saafi dhalaalaya ah iyo durdur aan qoto dheerayn ayaa jeexay saldhagaxa hoose, ilo yaryarna waxay ka kala baxaan sagxadda dhulka. Wabigan, biyashubka ugu weyn ee Oogooyinku wuxuu magaca ka wataa biyaha badan ee habeenka kordha, uumibaxa maalintana biyuhu hoos u degaan ilaa boqol yaardi. Waxaannu ogaannay heerkulkiisu in uu yahay 73° Fahr. (cimmiladu waa 78°). Ciidankayagii godad ayay ciidda ka qodeen, intii ay durdurka ka cabbi lahaayeen, taasoo caddaynaysa cabsi ay ka qabeen culaaculo. Biyuhu meeshu dhadhan wiyeer yalaalugo leh ah ayay ahaayeen.

Haddii aannu laba teed oo iskudhoon gaagaaban oo is barbar socda ah u sii raacnay Biyo Guure, waxaannu galnay karin ciriiri ah oo dhagaxnuurad iyo dhagaxciid ay ka buuxaan. Halbeegga dhaaracyadu waa qiyaasta 45° galbeed, ku kala aaddan waqooyi iyo koofur. Biyo ayaa ka soo qulqulaya dhaqax walba, xatabadaha dhagxa ah aad uga darrooraya, ciidda ka soo maaxaya, tuurkana kor uga soo burqanaya. Heerkulku aad buu u kala duwanyahay dhankan. Meelaha qaarkood biyuhu waa qabow baraf ah, meelo kale kulbeeggu wuxuu sheegaa 68° Fahr., meelo kalena 101°, halka ugu sarraysana waxay gaaraysay 126°, markii aannu booqannay. Midabbadu sidaa si la mid ah ayay u kala duwanyihiin. Xaggan, sagxadda sibsibta ee dhagaxciidka waxaa ku dahaaran dhado-baraf milix iyo nitre isku dhafan ah. Xaggoo, meel durdurku aanu socon, waxaa ku yaal balliyo midab cagaar madow-xigeen ah ama mirir-cas daxal u eg. Dhinacyada karikuna waa dhiin cas, geedsaar nooc sillon ah ayaa qararka ka soo laalaada, caleemihiisa dhalaalayana biyo ayaa ka gobo' leh. Gebiyada kore waxaa ku dedan cutubyo Mooli ah.

Gammaankayagii inta waardiye uga tagnay ayaannu bilownay in aannu tafno karinka adag ee qarka ah, kaa oo marka ballacu sii yaraadaba bilicda qurux miiran noqda. Qayb ka mid ah, babaca buur dhagaxnuuradeed boqollaal cagood dherer jeedda ah ayaa waraqa ku libidhay oo kalabar dhadhaabbo aad u waawayn tuumisay. Dhadhaabbadaa ayuu durdurka hugmaya oo hadda biyadhac yar lehi ku wareegaystaa, dabdeeddna halkaa ka sii siibtaan looxaan dhagaxyo balballaaran oo xalleefyo ah. Halkan waxuu jaraa khuuriyo, biyaqabatinno qoto dhaadheer oo nadiif, ah sidii barkado macmal ah dhagaxciidka dushiisa ku yaal. Halkaa wuxuu haddana aayar hoos u raacaa bed ciid saafi wirwirqaya ah. Kuraha sare waa midab hurdi ah, dhadhaabbada waawayni waa bayl cad, dulaha waxay ku sitaan geedaha daadxoorta ah ee uu keenay roobkii sannad hore. Inta roobka maansuunku jiro ee karadda xiimaysaa ay joogto uga soo gaddoonto Buurta Wagar, waraqani waa mid qurux dabiici cajiib ah leh.

Awdal ku dhex fiday ilaa Xabashiya. Haraadigii dhiskooda ayaa laga helay Saylac iyo Harar, sida sheeko lagu hayana Berbera waxay ku lahaayeen degmo loogu magacdaray ninkii bilaabay, Bandar Cabbaas. *[B]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samawade Books

Haddii aannu fuulintaan daal leh ka soo laabannay, waxaannu u nimi kuwo Reer Axmad ah oo barta Biyo Guure ka dhulgalo agteeda ka dhisaya qalcaddii yarayd ee dhagaxa ahayd ee goob-ilaalada meesha laga yaqaan ah. Tani dareen ayay ka dhalisay Berbera. Dhismahaa waxaa loogu talo galay in uu noqdo bakhaar badar lagu kaydsho, se cawaanta shakiga badan ee Muuse Ciise iyo Makaahiil oo dhulkan degaa waxay u arkeen isku day lagu khatar gelinayo. Ku sii socodkeennii guriga, waxaannu sii marnay goob qabuuro ballaaran oo qabriyadu aysan dayacnayn, dhismahoodana waxba ku gooni aha oo lagu garto aanu jirin. Sidaa oo ay tahay, Soomaalidu waxay ku adkaystaan in qaaruun iyaga ka horraysay ay lahayd qabriyada. Agtooda waxaa ku yiil burburro tinnaarro haddii la isu fiiriyo waa dambe ahaa, maxaa yeelay; jajab dhuxul ah oo cadad dhoob jajabay ahi ku qasanyahiin ayaa yiil, iyo raadka guryaha dhereran oo degaan ahaa qolaha u kala qaybsan. Wuxuu gurigu ka dhisnaa jaajuurka qorraxda lagu qallajiyo ee Aasiyada Dhexe yaqaan, halkanna dhif looga helo.

Burburradii haddii aan booqannay, wax Berbera igu sii hayaa waa ay yaraayeen. Magaaladii waxay noqotay meel aan loo adkaysan karin, kulka mundulka gudihiisa ka jiraa wuxuu ahaa xad-dhaaf, dabaysha iyo boorku waxay u xumaayeen si aan ka yaraysan Cadan, uskaguna sidaa oo kale. Sida caadada ah, daqiiqad firaaqo ah na la ma siinayn, Carab iyo Soomaaliba, iyaga oo u haysta in ay xaq u leeyihiin in ay iska soo galaan, gudaha farfariistaan, aad wax u dhugtaan, iska sheekaystaan, marka ay rabaanna iska baxaan. Ha se ahaatee, ka hor safarkii laabashada [Cadan] ayaa la iigu yeeray in aan xalliyo arrinta Abbaannimada. Xammaali dabcan soddoggi Buraale Nuux oo Reer Gadiid aha yuu u qoondeeyay in uu abbaan u noqdo Lieut. Herne iyo aniga. Buraale wuxuu noqday dhagarlow la soo baxay afxumo iyo khaa'innimo, carqalado badanna wuxuu hor dhigay qofkii uu u shaqaynayay. Sidaa oo ay tahay, caadadu ma ogolla oo Abbaanka sidii haweenay la ma xiri karo, Xammaalina shaqadiisa ayuu wuxuu ku mutaystay tixgelin buuxda. Dhanka kale, Xasan Jaamac, nin dhiirran oo ugaas u ah Reer Axmad, wuxuu igu la kulmay Cadan 1854, waxaana aan Abbaannimo siiyay fargashi. Intii aan Harar ku maqnaa, ninkaa waxaa xil ka saarnaa Lieut. Stroyan. Isla subaxii aan imidba aqalkii ayuu yimi oo fariistay, isaga oo waran gacanta ku sita, fargashigiina soo bixiyay oo ballanqaadkaygii sheegtay. Si dirqi ah ayaan ugu diidayfikirkiisa ah in hadiyadda loo siiyay safar wa hore loo dan lahaa, Xammaalina waa in aan isagana la niyad jabin. Jaamac wuxuu ku jawaabay in Abbaan weligi uu Abbaan yahay, Xammaali iyo tolkiisa ba uu necebyahay, Buuraale Nuuxna uusan wax heshiis ah la geli doonin. Waxaa arrinkii sii murjiyay, Lieut. Stroyan ayaa wanaag ka sheegay geesinnimadiisa iyo shaqadiisa. Markan wuxuu si anshax xumo leh ugu adkaystay dadka uu wakiilka ka yahay in uu dhan kale oo magaalada ah u rarayo. Tan waa ugu sabri weynay, taladaana waa ku diidnay.

Beryo ayaa muran ka dhex taagnaa dhinacyadii is hayay. Ugu dambayntii, waxaa la isla gartay in aan iskay Abbaan ugu dhex doorto shirka Odayaasha hortooda. Odayaashii xeebta ayay fariisteen, iyaga oo mid walbaa dadkii raacsanaa goobo furan oo gooni ah la fariistay, iyada oo dhammaan la wada kadaloobo, gaashaammo sita, warmana dhulkna

SamWaale Books

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

qotomaan. Markii la ii soo cid diray ayaan goobbtii soo galay, aniga oo seef gacanta ku sita, oo inta fariistay ka war sugay iyagii. Markii yabaqii badnaa joogsaday dabadeed, ayuu Jaamac istaagay oo cod dheer igu wayddiiyay, 'Yaa Abbaankaaga ah?' Jawaabtu waxay ahayd 'Buraale Nuux!' Aniga se oo ogaa in ayan reer Afrikada Bari hadal yaraan qaddarin, ayaanan gefin in aan jawaabtaa baane khudbadaha caadiga ah aan ka dhicin oo Carabi ah daba dhigo. Dabadeedna, inta seeftaydi garabka u ritay ayaan shirkii degdeg uga tegay. Guul ayay ku dambaysayarrintaa. Saaxiibbadayadii coldoonnada ahaa waxay fadhiyeen duhur laga soo bilaabo ilaa qorraxdu ka dhacday. Markii aannu cashadii laasannaydabadeed, ayuu mid iyagii ka mid ahi war san oo 'shir nabadeed' ah keenay. Jaamac ayaa Buraale ka codsaday in uu ku dhaarto in uusan wax cuqdad ah ka qabin haddii uu kala wareego qof isaga loogu ballanqaaday. Buraale waa dhaartay, mar kale ayaana saytuunku[24] ka dul babbaday ragkarmeedyadi Berbera.

Febraayo 5, 1855, ayaan inta jaallayaashay ka soo tegay soo fuulay *Al-Kasab*, sidaa ayay doontayadu magac bacaw ah u lahayd e, iyada oo farxad aan qarsoonanyni ka muuqato Xammaali, Guuleed Dheere iyo Yawmul Qiyaame oo u qaadan la' sida ay Berbera uga baxeen iyaga oo bed qaba[25] Haddii aannu xagga xeebta u sii dabayshannay, duhur hore ayaannu soo gaarnay Siyaaro, meel lagu yiqiin in maraakiibtu ku kulanto oo ilaa 19 mayl bariga kaga beegan Carwada [Berbera]. Marsadu xagga waqooyi waa u furnayd, teed dugsoon oo dhagaxnuuradeed dhadhaabbo ahina wuxuu ka caabbiya dabaylaha waqooyi-bari ka soo dhaca. Jaan dhul bannaan oo ciid ah ayaa magaalada hantideedii oo dhammi ku taal. Waa laba guri oo dhagax iyo dhoobo ah oo mid uu wali qabyo yahay, kan kalena uu soddon sano ka hor dhisay nin Faarax Binni [Biin?] la yiraahdo oo ugaas u ahaa Makaahiil. Ilaa dhawriyotoban badawiyiin warmooley ah oo Makaahiilka degmada deriska la ah ayaa sidii saf tukeyaal ah xeebta u kadkadaloobsaday, si ay noo qaabbilaan marka aannu doonta ka soo degno. Si hadal kulul ah ayay lacag nooga dalbadeen, hadii aannu rabno in aan ka cabno ceelasha oo hantidooda ugu muhiimsan ah. Aniga oo aan doonayn in aan Bebera agteeda cid ku la murmo, ayaan aniga oo maanka kuy haya wixii ku dhacay Burckhardt[26] oo markii uu ku guulaystay in uu soo xajiyo dabadeed loo diiday in uu booqdo qabrigii Haaruun ee Siinay ku yiil, ayaa waxaa isaga oo ordaya yimi badwi, si uu noogu sheego in meel walba sidii aannu doonno u mari karno. Isaga iyo jaallayaashiba wuu u cudurdaaray, isaga oo lamahuraannimo cuskaday, caatadiisuna waxay marag u ahayd cudurdaarkiisa.

---

[24] Saytuunku waa kan salliida laga tuujiyo ee Qur'aanku sheegay. Geedkaa iyo caleentiisa ayaa waxay calaamd u yihiin nabad iyo heshiis. *[T]*

[25] Khatar ayay ku jireen oo dil dhagar qaba oo dhowr beri ka hor intii aannaan iman la gaystay ayaa Garxajis oo dhan ku khasbay in ay magaalada ka cararaan. Dabadeed, col 5000 oo nin ah ayay Buulaxaar ugu ururiyeen dagaal iyo dil. Arrintaa Habar Awal ayay ka caraysiisay. Dhab ahaanna, haddii aannaan joogi lahayn martidan 'ilma'adeerradood' si xil leh ayay u la dhaqmi lahaayeen. *[B]*

[26] Johann Ludwig Burckhardt (Jean Louis / John Lewis, 1784–1817), wuxuu ahaa dalmar juquraafiyahan Swiss ahaa oo abbaaraha sanadii 1809 si dahsoon Xaramka Maka ku galay, dabadeedna saddex bilood halkaa joogay oo ka soo warramay wixii uu ku soo arkay. Richard Burton ruuxiisu Maka sidaa si la mid ah ayuu mar ku tegay oo uga soo warramay. [T]

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samawade Books

Ceel weyn ayaa ku ag yaal derbiga bari ee guriga la degganyahay; qiyaasta 18 cagood ayuu qodanyahay, saddex-meelood oo meel ayaa dhulka ku aasan, labada kalena waa dhagaxnuuradeed, guntana waxaa fadhiya biyo yar oo macaan nadiif ah. Agtiisa waxaan ku arkay barkado burburay oo malaas wanaagsan laga dhisay, sidii burburradii Berbera. Ceelka kale wuxuu ku yaal ilaa mayl barki meel xagga waqooyi ka xigta kan hore, isagana waxaa laga qoday qar dhagaxnuuradeed ah.

Dhawr yaardi meel ka xigta dhismaha waqooyi-bari waxaa ku yaal Furzah ha [Furdada?] ama aqalka kastanka oo xeelyarida dhismihiisu uu igu shukaaminayo in aan qeexo: waa kob afargees ah oo lagu meegaaray xero dhagxyo yaryar oo tuuran ah, masjid la'eg oo sallax dhagaxshacaabi yuuban oo xagga jihada Maka qiblo ku leh ah. Taag yar oo isaguna dhagax ah oo xagga waqooyi xiga, waxaa ka taagan derbiyo burburay oo weheliyeyaashaydu ii sheegeen in uu dhisay Faranji dhulka ka iibsaday Makaahiil xeebtaa xun degay. Haddii aannu ka tagnay badawidii oo qalbiyadooda ay xoogaa hadiyado yar yar ahi farax geliyeen, waxaannu sii wadannay u gooshiddayagii xagga la simanka xeebta. Subixii xigay ayaannu soo marnay laba haram oo dhagaxmadow jajabay ah laguna magacaabo Dabada Gumbar Madow. Maalin daal badan shiraacashadeed oo 20 mayl 24 saacadood lagu soo jaray, ayuu naakhuudihii *Al-Khasab* nagu dejiyay khoori galbeedka ka xiga Ceeldaraad. Dhawr doonyood oo kuwa idaha qaada ah ayaa ku xirta [deked macmal ah] sida caadada ah marka baddu ka kacsantahay marsada weyn, shaqaalihii doontuna waxay noo sheegeen in ciidan badawiyiin ahi ay duullaan ku soo yihiin tuulada. Cabdi Maxamad Diban [Deebaan?], hayaha Qalcadda Ceeldaraad ayaa dabadeed isku magacaabay in uu Abbaan ii yahay, Berberana uu ku soo haray, aniguna raggaygii ayaan hubeeyay oo inta naakhuudihii *Khasabka* ku amray in uu doontiisa soo dhoweeyo waaberiga hore u degdegay oo u lugeeyay saddexda may l ee naga xigay meesha. Qalcaddii haddaanu nimi, waxaannu ogaannay in ayan addoomihii Cabdi waxba ka ogayn duullaanka la sheegay. Si ay ay ahaata ba se, si fiican ayay ii soo dhaweeyeen, waxayna keeneen casho waxa kaliya ee ay haystaan ahayd oo ka koobnayd timir dhadhan xun iyo areerin. Annaga se oo aan doonayn in aan kaydkooda yar wiiqno ayaannu aniga iyo Xammaali gacmaha uun darnay cunnadii. Guuleed Dheere iyo Yawmul Qiyaame iyagu dhakhso ayay saxanmadii u dhaariyeen, iyaga oo cay ku tuuminaya cunnadan baas e aan dhuunta ka degayn. Cashadii ka dib, muran ayaa ka dhex dillaacay Xammaali iyo mid ka mid ah Habar Toljeclada dhulka degta. Badawigii oo aan araggayga jeclaysan ayaa sheegay in uu sidayda ba waran iga dusinayo. Xammaali ayaa taa ku diiday oo u sheegay haddii uu sidaa yeelo in isna u daba marin doono waran la mid ah. Muran dheer ayaa bilowday, intii dhegaysanaysayna waxay maad ka dhigteen sida aanan dan ugu gelin oo dheg jalaq ugu siinayn. Markii uu heshiis ku dhammaaday [murankii], sidii aan filayay, ayaa addoomihii gogol ku dul fidiyeen jiimbaar Berberaawi qallafsan ah, oo inta haddana maaddii dartii gufaaco qosol ah ka wareegeen iga tageen, si aan u seexdo. Waxaannu dabadeed cunnay ugu yaraan neef ido ah maalintiiba, hilibka moofada doonnida lagu dubaana Soomaalida waa u macaan. Casho kale ayaa dooni ka harsanayd, taa oo malaha saamayn ku yeelatay maanka gaaban ee naakhuudaha *Khasabka*.

Samewage Books

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Subaxii haddii aan soo toosay, dibedda ayaan u baxay, aniga oo meel tuuryo gaadho ka filayay doon, ka ma se ay muuqan meelna. Abbaarihii laba saac oo subaxnimo ayay ilikuwareedhayda badda ka soo muuqatay dhibic yar, intii ay soo dhowaanaysayna degmada ayaan sii indha'indheeyay.

Ceeldaraad, meel aan loo xiisin oo dhacda jihada bari-waqooyi-bari, Berberana 40 mayl u jirta, waa marso yar oo loogu xisho guud ahaan biyaheeda oo aan ka dhicin kuwa Siyaaro. Barroosindhiggeedu ma fiicna. Shimaalka ama dabaylaha waqooyi safaf dhaadheer oo hirar culus ah ayay ku soo xaaqaan marsada furan, guntuna waa tuur dhagax adag iyo shacaabiciideed isugu jirta. Kontonka aqal ee qorraxdu gubtay dabayshuna basaasisay waxaa laga dul dhisay kur bataax iyo dhagxnuuradeedka caadi ah dushooda ku taal. Markaa aan booqday raggii oo idili waxay u qaxeen xagga Berbera. Guud ahaan waxay magaaladu ku tiirsantahay ka gancsiga addoonta, Carabta oo door bidda awgeed in ay badeecadooda nool ka rartaan meel ka fog carwada weyn[27].

Lieut. Herne markii uu booqday wuxuu suuqa ugu tegay tiro badan oo 'dahab madow' ah. Qalcadda Ceeldaraad ee uu 30 sannadood ka hor taagay Maxammad Deebaan waa guri dhagax iyo dhoobo ka dhisan oo afargees saqaf fidsan leh ah. Daaqaduhu waa meel sare, hawaysi tagxeello uu qaabkeeda fahmi karo uun Vitruvius[28]kii dhisay, marka laga reebo hal daar-ilaalo yar oo xagasha waqooyi kaga taal.

Ceel ma leh, xaynta guryaha ahina waxay ku urursanyihiin meel derbiyada u dhow. Shanta buntukh ee meeshaan uu dhigay Sharma'arke markii Bebera laga soo caryshay, waxay qotomaan meel qalcadda bannaankeeda ah oo aan si fiican loogu meel dayin in ay carronade[29]-yo calculus xajin karto. Kanooniyo loo ma keenin [rasaas], taasi se waxba ka ma aha meel shiidad ka buuxaan. Waxaa sii dheer, addoomaha Cabdi si fiican ayay waxay ugu hubaysanyihiin buntukhyo iyo baastoolado, badwiyiintii Toljeclana[30] waranka

[27] Ganacsatada addoomaha ee xeebtan Carabta ayaa ugu indho adag. 1855, Maxamad reer Masqat, nin markab leh oo wax badan Cadan taga ayaa meel noo muuqata wuxuu ka iibsaday nin ay isku meel ka yimaadeen gabar Carab xor ah oo qabiilka Yaafici Caqaaribta Bir Xaamid ka ah. Dabadeed inta Berbera keenay ayuu ka sii iibshay nin ay isku carri ka yimaadeen. Dambigaa oo kale wuxuu istaahilaa ciqaab adag; xataa Xabashidu waa deldelaan Kiristaankii lagu helo isaga oo iibinaya qof ay isku diin yihiin. Addoonsi ka ganacsadaha Carbeed badanaa addoonta hantidiisa ah wuxuu u guursadaa khaa'innimo, marka uu Masqat ama Bushiiri yimaadana inta furo ayuu iibiyaa. In badan ayay hablo Soomaaliyeed oo xor ah tan oo kale ku dhacday. *[B]*
Wax la hubo ayaa ka jira in Soomaali aan tiradooda la aqoon oo la malaynayo inay dumar u badanaayeen addoon ahaan loo kala iibsaday, sir iyo saaq , siiba xagga Gacanka Carbeed loo iib geeyay. *[T]*
[28] Marcus Vitruvius Pollio, wuxuu ahaa muhandas Roomaan ah oo dhismaha ku caan baxay. Wuxuu noolaa qarnigii koowaad ee miilaadiyada ka hor. *[T]*
[29] Kanooni culus, dhuun gaaban, oo Ingiriiska lagu sameeyay. *[T]*
[30] Habar Toljeclo (hooyadii lafta Mailah [?]), waa faracii Isxaaq Al-Xadrami iyo gabar addoon Xabashi ahayd, waxay degaan carri bariga ka kaga beegan Berbera. Degmooyinkooda ugu waawayni, Cacytaraad ka sokow, waa saddexda dekadood ee yaryar ee Karam, Cunqor iyo Xays. Tan hore, sida laga hayo Lieut. Cruttenden, waa 'tan ugu muhiimsan xagga dekeddeeda iska roon iyo iyada oo ah meesha Cadan ugu dhow oo marinkeedu yahay N.N.W. [jiheeyaha: Waqooyi-Waqooyi-Galbeed]. Sidaa darteed, dabaysheedu

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved
Samawade Books

waxba kaga ma qaadi karaan derbiyada dhagaxa ah. Magaalo-askareedda meesha deggan waxaa dhow mar xayiraad ku soo rogay deriskeeda dhibka badan oo xooggoodu aanu soo dhaafin qacda hore.

Si sabir la'aantayda loo dejiyo ayaa dhawr guri la iga casumay, si aan caano ciir ah u dhamo. Farxad dhagaraysan ayaan la kala badbatay, markii duhurradii uu soo dhigtay naakhuudihii Khasabka ee Machiaveli[31]-ga ahaa oo haleelay in uu baroosinka u dhigo, ka dib markii uu doontiisii waalnayd soo dhex jiirsiiyay bad ay Shimaashu xeebta ku harqinayso hirar qalqaloocan oo xoor dafaha ku leh. Xeebta ayaan istaagay, aniga oo huuri aan doonida ku gaaro u gacanhaadinaya. Sidii aan rabay loo ma dhaqaaqinee raggannimadu ahayd. Ugu dambayn, abbaarihii 7 saac oo duhurnimo ayaan doonta dheeggeeda sare isku hubsaday.

'Dawir al-farmaan' [farmaanka roga!]' ayaan ku dhawaaqay, cod sidii onkod ah. Jawaabtu waxay noqotay yabaq guud oo la is la dhex yaacay. 'Dhabtii bad sidan ah ku ma ku safri doonaa?' aya is wayddiiyeen naakhuudihii iyo wehelladaydii oo gariiraya. 'Wuu ku safri doonaa!' ayuu Xammaali si kulul oo ay weliso madax gilgilid ugu tiraabay. 'Dabayl baa dhacaysa –' ayuu Ra'iiskii ku cawday. 'Haddii dab dhacayana?' ayuu Xammaali isaga oo jilaya waydiiyay, taa oo macnaheedu yahay balada Faranji madax adag uu dhigo meel laga galaa ma jiri doonto.

Nooc baroorgeeriyaad ah ayaa cirka isku shareeray, intii uu socdayna si aan qosol aan waqtigiisii joogin u qariyo ayaan galay khan weyn oo doonta salkeeda ku yaal oo 'shirka' lagu magacaabayay. Halkaa ayaa dhegahaygu ka maqlayeen calaacallada codsiga ah ee shaqaaluhu ku doonayeen in maalin uun la baaqdo. Dabadeed, mid ka mid ah ciidankii qalcadda oo uu weheliyo naakhuudihii oo gariiraya, sidii qandho hayso, ayaa goostay guuto cammaaryaley ah dumaan iyo in ay la yimaadaan erayo *naar* ah oo maskaxda adag ee Faranjiga wax ka beddela. Ha se ahaatee, afka ka ma dhammaan erayadii ugu horreeyay, markii si ciyaar ah inta guudkiisii weynaa la qabtay oo la qaaday shirkii shukaanta dibadda looga soo saaray oo sidii jawaan buskud ah dheegga sare loogu tuuray. Talo faro waa ka baxday inninka. Martidii oo dhammi badda ayay isku tuureen – waa sida dadku uga degtaan maraakiibta Bariga Afrika e, baroosinkii ayaa loo dhigay,

---

waa iska dhexdheexaad, doomaha idaha suuqa Cadnmeed loogu raraana habeen qura ayay badda u sii dhaxaan, halka kuwa Berbera ka tagaa ay badanaa saddex ku qaadato. Waxa qiimaha Karam sii kordhiyaa waa u dhowaanteeda dhulka Dhulbahantaha oo meel afar maalmood loo socdo u jira, ganacsigooda ugu waynina dekaddaa maro. Reer Yuusuf, jilib ka mid ah Habar Toljeclo ayaa hadda Karam haysta , iyaga iyo qabiilooyinka dabaylaraaca ka xigana waxaa dhex yaal collaytan kii ugu xumaa oo aan dawo lahayn. Taa ayaa sabab u ah dilal badan oo lagu gaystay Karam shantii sano ee ugu dambaysay, ilaa haddana aan loo aargudin. Dekedaha yaryar ee Cayntarad, Cunqor, Xays iyo Rukuuda wax sidaa ah oo la sheego ma leh, marka laga reebo tan ugu horraysa oo Cadan la leh ganacsi idaad.' *[B]*

[31] Niccolò Machiavelli (1469-1527), wuxuu ahaa faylasoof xirfado badan oo Talyaani (Dawladdii Florence) ahaa. Waxaa gaar ahaan loogu xusuustaa qoraalkiisii siyaasadeed ee caanka noqday, *Il Prince* (The Prince). *[T]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Samewade books

shiraacii tan ah la furfuray, *Khasabkiina* waxay bilowday in ay si xoog leh u dhex kacaadegto badda dhanaanka weyn, sidii alderman polka[32] ciyaaraya.

Noloshayda markii iigu horraysay ayaan waxaan arkay Soomaali cunno cuni waayay, oo kaaga darane cuni waayay hilib idaad. Maanyow iyo aragagax aan loo baahnayn ayaa naakhuudihii, shaqaalihii iyo rakaabkiiba noo naceen dhamaan idihii la moofeeyay, saddexdeennii oo aan il cawro rumaysnaynna waxaannu bogaadin whehel leh ku cunnay hilibkii, madax laga bilaabo ilaa majo. Habeenkaa mawjaduhu waa naga sarreeyeen.

Yawmul Qiyaame wuxuu iku mashquuliyay in uu ku dheeraysto ducooyin gaar ah oo loo yaqiin in ay badda kacsan dejiyaan. Wuxuu joojiyay markii Guuleed Dheere tusay in duufaan waalani na daba socoto, sidii ay ku jeesjeesayso, mar walba oo uu aad u duceeyaba. Naakhuudahii oo ardaal la yiqiin ahaa, beriigana lagu yiqiin tixda dareenka haweenka iyo ragga laga mariyo iyo dumar jacayl, si kal iyo lab ah ayuu u tukaday, waxaana ku soo biiray dhowr shaqaalihii ah oo sida muuqata wanaag ka dareemay camalkaan suubban. Habeenbarrki marka ay ahayd ayaa Sultan al-Bahror [Suldaan al-baxuur] Boqorka badda, nooc nibiri ah, meel noo dhow ka muuqday. Maadaama xayawaannadaas ku caan yihiin geddinta doomaha, aragtidiisii ayaa qaylo argagax iyo hooris adkaar diineed ah laga qaaday.

Subaxii Jimcaha, Janawari 9, 1855, ayaannu ka soo kudnay meel ku beegan Jabal Shamsaan [Shaanshaan], figta ugu dheer folkaane bureedka Cadan. Intii aanu habeenku dumin ka horna waxaa farxad ii ahayd in aan mar kale arko wajiyada saaxiibbo iyo jaalleyaal aan muddo is moogayn.

Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame
Email: Bodhari.warsame@gmail.com

Boodhari waa qoraa tarjumay ama gacanta ku haya buuggaag badan oo qiimo taariikheed ku leh Soomaaliya. Waxa uuna si joogto ah qoraaladiisa ugu soo ban dhigaa degelka WardheerNews

[32] Alderman (men) waa magac darajo oo loo adeegsan jiray ragga madaxda ka ah dawladda hoose ee Ingiriiska iyo Ayrlaand waayo hore. Polka waa ciyaar dhaqameed asalkeedii ka soo jeedda Bohemia. Laba qof (lab iyo dheddig) ayaa wada ciyaara, waxyna caan ku tahay sida loo cayaaro oo saddex tallaabo oo inta la isla qaadayo ay ku xigto booddo gaaban iyo rucle. *[T]*

Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Sanewaag Books